

Xaanshida Warbixinta Ka qeybqaataha



MASHRUUCA 15 KA MAARSO: SAAMEYNADA IYO KA SOO KABSIGA

Deegaan ahaan: Jaamacada Otago,
Christchurch

Tixraaca anshaxa: 19/NTA/147

Hogaaminta Mashruuca: Dhaqtar Caroline Bell Lambarka taleefonka: 03 3726700

السلام عليكم

Waxaa laguugu casuumay inaad ka qeybqaadatid mashruuc lagu fiirinayo saameyta weerarkii argagixisada ee 15kii Maarso. Tani waxeey naga caawindoontaa in aan fahamno sida ey weeraradii u saameeyeen bulshada Muslimminta ee kunool Christchurch. Waxaan rabnaa in aan la hadalno/wareeysano dad badan xitaa hadii ay dareensanyihiin inay si fiican uga soo kabsadeen.

Waxaan kuugu casuumeeynaa inaad ka qeybqaadatid mashruucaan sababtoo ah;

- Adiga ama qof qoyskaada ka mid ah ayaa joogay ama u dhawaa mid kamida ah labada masaajid 15kii Maarso 2019
- Waxaad tahay xubinta qoyska dhow ee *shuhadada* ama dadkii dhaawacmay
- Waxaad tahay xubinta qoyska dhow ee qof joogay ama u dhawaa mid ka mid ah labadii masaajid ee maalintaas.
- Waxaad ka tirsantahay bulshada Muslimiinta Christchurch, waxaadna joogtay Christchurch amaa aad imaatay isla markii uu weerarka dhacay hadana Canterbury ayaad dagantahay.

Xaanshidaan Warbixinta Ka qeybqaataha waxay kaa caawineysaa sidii aad go'aan u gaari lahayd haddii aad jeclaan laheyd inaad ka qeybqaadatid. Waxay dajineysaa sababta aan u sameyneyno mashruucaan, waxa ay ka qeybqaadashadaada ahaaneyso, faa'idooyinka iyo halista kaaga imaankarta iyo maxaa xigga markii mashruucaan uu dhammaado. Waxaan kula dulmari doonaa warbixintaan waana kaaga jawaabeynaa su'aal walba oo aad qabtid.

Haddii aad ogolaato inaad ka qeybqaadatid mashruucaan, waxaa lagu weydiinayaa inaad saxiixdid Foomka Ogolaanshaha. Waxaa lagu siinayaa koobiga Xaanshida Warbixinta Ka qeybaataha iyo Foomka Ogolaanshaha si aad u haysatid hadii aad rabtid inaa dib u raacdid markale.

Fadlan hubi inaad aqrisay oo aad fahamtay dhammaan qoraalka. Haddii aad wax su'aal qabtid, fadlan na weeydii.

WAA MAXAY ULAJEEDADA MASHRUUCAAN?

Tani waa marxalada koowaad ee mashruuca lagu eegaayo sida dadka ay uga soo kabsanayaan iyo sida eey uulaqabsadeen dhacdadii 15kii Maarso muda dheer kadib. Waxaan isticmaaleynaa qiyaaso kala duwan oo qiimeynaayo bulshanimada, cilmi nafsiga, ku xirnaanta diinta iyo saameynta COVID-19. Wareeysiga kadib, hadii ka-qeyb qaataha iyo kalkaalisada ey isla wada arkaan in daryeel dheeraad wax tar ka imaan karo, waxaan kaa caawin karnaa sidii aan kuugu sii gudbin leheen adeegyo kuugu haboon

Waxaan fileeynaa in wareysiyada marxaladan ay sii socon doonaan ilaa dhamaadka sanadka 2021.

Mashruucaan waxaa maareeynaayo Borofeesar La xiriiro Caroline Bell, Dhaqtar Ruqayya Sulaiman-Hill, Borofeesar Richard Porter, Dhaqtar Ben Beaglehole, Borofeesar Joseph Boden, Dhaqtar Shaystah Dean kuwaasoo katirsan Waaxda Daawada Cilmi nafsiga ee Jaamacada Otago, qeebteeda Christchurch iyo Borofeesarka Philip Schluter ee katirsan Iskoolka Caafimaadka Sayniska ee Jaamaacada Canterbury. Waxaa maalgeliyay Gollaha Cilmi baarista Caafimaadka ee New Zealand iyo Aasaaska Cilmi-baarista Caafimaadka ee Canterbury.

Mashruucan wuxuu heeysataa ansixinta anshaxa Gollaha Anshaxa Caafimaadka iyo Curyaanimada (HDEC) tixraaca Anshaxa: 19/NTA/147.

MAXAY KU LUGLEDAHAY KA QEYBQAADASHADEYDA MASHRUUCAAN?

Haddii aad go'aansatid inaad ka qeybqaadatid mashruucaan, waxaad wareysi dhinaca qadka ama mid fool-ka-fool la yeelanaysaa mid ka mid ah kooxdeena cilmi baarista mid Muslim ah (ama mid aan Muslim aheyn haddii aad rabtid) iyo kalkaaliso ku taqasustay cilmi barista. Waxaan isku dayeynaa inuu wareystaha ku hadlo luqada aad adiga rabtid. **Wareysiga wuxuu qaadanayaa qiyaastii 2 saacadood.**

Waxaan jeclaan laheyn inaan kalsooni buuxda kaa siino inaan ku weydiin doonin inaad dulmartid dhacdadii iyada oo sharaxan.

Inta lagu jiro xaalada wareysiga waxaad buuxineysaa su'aalo taxana ah oo ku saabsan sida aad uuga soo kabsaneysid, caafimaadkaaga cilmi nafsiga (maskaxda/dhimirka) iyo midka jirka. Su'aalaha qaar waxay ku saabsanyihiin shabakadaha ku caawiya/taageera, sida ay diintaada kuu caawisay, sida uu kuu saameyay COVID-19 iyo su'aalo guud ee ku saabsan adiga iyo qoyskaada. Waxaa kale oo jira qeyb lagu qiimeeynaayo caafimaadkaada/ladnaantaada. Kalkaalisada waxeey ku waydiineysaa su'aalo ku saabsan xaaladaada iyo sida aad tahay.

Waxaan jeclaan laheyn inaan fahamno saameyn kastoo kutimid caafimaadkaaga jirka iyo sideey wax isku badaleen. Si saas loo sameeyo, waxaan ku weydiisaneynaa inaad noo ogolaatid inaan isticmaalno lambarkaada caafimaadka gaarka ah, NHI (National Health Index)) si aan isku barbardhigno tirada waqtiyada aad booqatay golaha caafimaadka 5tii sanno ee ka horeeysay iyo 5tii kadambeesay 15kii Maarso inta aad ku jirto mashruucaan (tani waxaa lagu fiirinayaa kaliyah tirada booqashada maahan sababta booqashada). Hadaadan rabin qeeybtan waad iska

deyn kartaa adigoo ku cadeeynaya dhamaadka foomka ogolaashada. Waxaa sidoo kale lagu weydiinayaa haddii aad ogoshahay ineey kooxda cilmi baarista markale kaagala soo xiriiraan arima ku saabsan daraasado mustaqbalka oo lagu fiirinaayo saameynta ka imaan karta muda dheer kadib dhacdadii 15kii Maarso.

WAREEYSIGA OO LAGU SAMEYN KARO QADKA IYADOO LA ADEEGSAANAYO ZOOM COVID-19 DARTIIS

Maadaamo uu Caabuqa Korona (COVID-19) isbadal ku keeni karo wada kulanka, waxaan wareeysiga iyo su'aalaha ku sameyn karnaa hadii loo baahdo qadka internetka anago isticmaaleyno Zoom telehealth. Haddii aad jeceshahay wareeysiga fool-ka-fool taasna waan kuu diyaari karnaa.

Zoom waa goob lagu isticmaalo khadka wicitaanada fiidiyowga. Tani waa adeeg bilaash (qarash la'aan) kuu ah. Markaan E-mayl kuugu soo dirno xiriirka Zoom (link) toos ayaad u isticmaali kartaa. Waxaad u baahan doontaa Wi-Fi ama Qat (Data) iyo kombiyuutar kamarad leh ad u isticmaasho Zoom si aan isku aragno. Haduusan kombiyuutarkaada lahayn kamarad, nala socodsii. Jaamacada Otago waxey isticmaashaa softiweerka Zoom oo dhameystiran kaasoo ay ka mid yihiin astaamo amnigaada sugaaya.

Inta lagu guda jiro wareeysiga Zoom waxaa kula socondoono mid ka mid ah kooxdeena cilmi barista mid Muslim ah iyo kalkaaliso. Ayagaa kuu sheegi doono wixii ad u baahatid kaagana jawaabi doono wixii su'aal ah oo ad qabtid.

Aad ayeey muhiim u tahay in wareeysiga aan ku sameeyno meel asturan oo lagaa soo dhex galeynin oona lagaa maqlaynin (siiba caruurta). Waxaan kaloo ku weeydiin doona nambor taleefan oo qof kuu dhaw oo ku wehliyo hadii aad adiga rabtid markii aad wareeysiga kujirtid.

Jaawaabaha aad ka bixiso waxaa lagu keydinayaa (aruurin doona) goob aamin ah (xifdisan) oo elektiroonig ah, waxaana loo keydin doonaa qaab aan lagaran karin aqoonsiga shaqsiga.

Anaga ma duubeeyno wareeysiga nagu dhexmara Zoom adigana waxaan kaa codsaneynaa in aadan duubin. Haddii aad u baahatid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Zoom telehealth, fadlan eeg dukumintiga kan ka baxsan.

WAA MAXAY FAA'IDOYINKA SUURTOGALKA AH IYO HALISTA MASHRUUCAAN?

Waa maxay faa'idooyinka suurtoqalka ah ee ka imaan kara ka qeybqaadashada mashruucaan?

Waxaan rajeyneynaa inaan helno faham weyn oo ku saabsan saameynta eey ku yeelatay weeraradii argagixiso ee 15kii Maarso dadkii sida tooska ah u taabatay, xittaa haddii ay dadkii dareensanyihiin inay si wanaagsan uuga soo kabsadeen. Dadka waxay bixin karaan jawaabo kala duwan balse waxaan u baahannahay inaan weydiino qof walba su'aala isku mid ah si aan u aragno waxa shaqsiyaadka ay u arkeen wax tar iyo waxyaabaha kale oo ay u baahan karaan.

Waraysiga kadib, haddii adiga ama kalkaalisada aad u aragtaan in caawinaad dheeraad ay wax kuu tari karto, waxaan kawada hadlidoonaa meeshii surtagal ah aan kuu gudbin karno.

Tani waxay noqon kartaa daryeel kusaleysan bulshada dhexdeeda, ka caawinta arrimaha wax ku oolka ah, ku xiriirinta dhaqtarkaaga guud (GP), ama kuwa ku takhasusay caafimaadka dhinacyadiisa kaladuwan.

Waaya aragnimada mashruucaan uuga soo baxda kooxda cilmi baarista waxay ku caawineysaa u dhisida adeegya caafimaad ee ku haboon dhaqan walba (qolo kasta). Muhiimada weyn ee mashruucaan waxeey tahay in la muujiyo dhibaatooyinka bulshada Muslimiinta wajihi karaan iyo in lasoo bandhigo jawaabaha wanaagsan ee lagu amaanay bulshada New Zealand iyo bulshada Muslimiinta deegaanka. Waxaan rajeeeyneeynaa ineey natiijada mashruucaan loo isticmaalo sidii loo daryeelilahaa hadeey soo wajahaan dhacdooyin kuwan la mid ah bulshada New Zealand iyo kuwa dibada.

Waa maxay halista suurtoogalka ah ee ka imaan karta ka qeybqaadashada mashruucaan?

Waan fahamsannahay in qaar ka mid ah qoraalada laga hadlaayo murugo ku tahay dadka qaar. Haddii aad murugootid, kalkaalisada ayaa ku caawineyso si adiga kuugu haboon. Haddii la arko caafimad daro ama halis waxaa loo gudbinayaa golaha caafimaadka. Haddii adiga ama qoyskaaga aad dareentaan in su'aalaha sababan murugo badan, waad ka bixi kartaa mashruuca xili walba.

YAA BIXIYO MASHRUUCA?

Ma jiraan wax qarash kugu ah adiga.

Mahadcelin ahaan dadka ka qeeybqaatay oo waqtigooda u huray mashruucaan waxay helayaan \$50 foojar ah.

WAA MAXAY XAQUUQDEYDA?

Qasab miyaa inaan ka qeybqaato?

Haddii aad ka qeybqaadato mashruucaan iyo hadii kaleba, waa iqtiyaarkaaga. Haddii aadan rabin inaad ka qeybqaadatid, looma baahno inaad sabab ka bixisid. Looma baahno inaad ka jawaabtid su'aalo aadan rabin inaad ka jawaabto, sidoo kale waxaad xaq u leedahay inaad dib u eegtid jawaabtaada oo aad badashid.

Qasab ma aha inaad hadda go'aan qaadatid haddii aad rabtid inaad mashruucaan ka qeybqaadatid. Ka hor intaadan go'aansanin waxaad u baahan kartaa inaad kala hadashid mashruuca dadka kale, sida qoyskaada/qaraabadaada, saaxibada, ama golaha caafimaadka. Waad samayn kartaa arintaas.

Ma la xifdindoonaa ka qeybqaadashadeyda mashruucaan?

Dhammaan warbixinta aad nasiiso si aad iyo aad ayaa loo xifdinayaa. Xifdinta aad ayeey muhiim u tahay waana hubineynaa arinkaas. Kooxda cilmi baarista waxay dhammaantood qaateen tababarka xifdinta oo waxay saxiixeen (ku dhaarteen) inaysan kala hadleynin wax warbixin ah oo adiga kugu saabsan qof kale oo ka baxsan kooxda.

Nambarada taleefanada luqadaha kala duwan hoos ayeey ku qoranyihiin, magacyada wareeystayaasha Muslimiinta ah waxay ku qoranyihiin ciwaanka otago.ac.nz/march. Waxaad

ka dooran inta meesha lagu soo bandhigay. Waxaa suurtagal ah inaad garanaysid qofka adiga ku wareysanayo maadaamo uu ka midyahay bulshadiina Muslimiinta . Si kastaba ha ahaatee, way xifdinayaan warbixintaada si gaar ah oo marnaba kalama hadlayaan wareysiga xubnaha kale ee bulshada.

Shaqsinimada qofka meelna laguma daabici doono. Warbixinta aad nala wadaagtay ayadoo lasoo koobay oo adigana lagu sheegeeynin ayaa la daabici doonaa.

Waxaan ku hayneynaa warbixinta cilmi-baarista ee adiga kugu saabsan qaab qarsoon oo shaqsigu lagaraneynin. Waxaa la isticmaalidoonaa lambaro qarsoon waxaana lagu keydindoonaa kumbuyuutar xifdisan oo yaalo Waaxada Daawada Cilmi nafsiga, Jaamacada Otago, qeybteeda Christchurch ilaa 10 sanno. Shaqaalaha sida tooska ah ugu lugleh mashruuca kaliyah ayaa geli karo warbixintaan. Qaar ka mid ah xogta waxaa loo isticmaali karaa cilmi baaris mustaqbalka ah, laakin tani waxaa gali kara cilmi baarayaasha kaliya.

Waxaad xaq u leedahay inaad aragtid warbixinta adiga lagaa aruuriyay intaad ku jirtay mashruucaan.

MAXAA DHACAAYO MASHRUUCA KADIB AMA HADDII MASKAXDEYDA IS BADASHO?

Haddii aad hadda rabtid inaad ka qeybqaadatid, laakin ey maskaxdaada isbadasho hadhowdii, waad ka laaban kartaa mashruuca waqti walba.

Maxaa lagu sameydoonaa natiijooyinka kasoo baxa cilmi baaristaan?

Waxaan qorsheynaynaa inaan dhameystirno wareysiga ilaa dhammaadka 2021. Natiijooyinka waxaa loo soo bandhigayaa bulshada Muslimiinta deegaankaan. Waxaa sidoo kale loo gudbinayaa joornalka sayniska si loo daaboco iyo in lagu bandhigo shirarka qaranka iyo kuwa caalamiga ah. Aqoonsiga shaqsiyaadka laguma shaacinaayo/daabacaayo bandhigyadaan.

YAAN KALA XIRIIRAA WARBIXIN DHEERAAD AMA HADDII AAN WALAACYO QABO?

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, walaac ama cabasho ku saabsan mashruucaan, mar walba cilmi baarayaasha way ku faraxsanyihiin ineey adiga kula hadlaan. Waxaa lagala xiriiri karaa inaad Kasoo wacdid ama qoraal uugu soo dirtid talefoonka mid kamid ah kooxda cilmi baarista inta lagu jiro saacadaha shaqada. Dhammaan kooxda dadka wareysiga ka qaadaayo waxay ku hadlaan luqada Ingiriiska.

- 0212790058 Ingiriis
- 0212791307 Soomaali

Ama I-meelka march15study@otago.ac.nz

Haddii aad rabtid inaad la hadashid qof aanan ku luglaheyn mashruucaan, waxaad kala xiriiri kartaa u doode madax banaan ee caafimaad iyo curyaanimada ee:

Mashruuca 15kii Maarso
PIS version no: 8

Boga 5
Taariikhda: 29
Maaso 2021

Taleefonka: 0800 555 050
Fakis: 0800 2 SUPPORT (0800 2787 7678)
I-meelka: advocacy@advocacy.org.nz

Wixii taageerada caafimaadka Maori fadlan la xiriir:

Rachel Day-Brown
Lambarka taleefonka: 03 3726700

Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa guddiga anshaxa caafimaadka iyo curyaanimada (HDEC)
ee ansixiyay mashruucaan:

Taleefonka: 0800 4 ETHICS
I-meelka: hdec@moh.govt.nz

Jazakum Allahu Khayr, Wasalaamu Calaykum